

## XUQUUQDEYDA



Iyada oo aan la eegeyn cida aad tahay ama asalkaaga, waxaad xaq u leedahay in ay shaqaalaha daryeelka caafimaadku ku siyaan macluumaadka aad u baahantahay.

Waxaa taa ay macnaheedu tahay in tusaale ahaan ay dhici karto in aad u baahato turjuubaan ama waxbixin qoraal ah, si aad u fahamto sida uu u dhacayo baadhitaanka lagugu sameynayo. Warbixinta lagu siinayaa waa in ay ku haboontahay marxala-daada iyo shuruudahaaga. Aad iyo aad bey muhiim u tahay inaad fahmi karto isla markaana aad ka qeyb qaadan karto dabiibbkaaga ama daryeelkaada.



Dhakhtarka ilkaha iyo daryeelayaasha ilkuhu waa in ay mar kasta ku wargeliyaan qiimaha ay ku kici doonto isla markaana kuu sharaxaan farqiga u dhexeeya marka uu jiro siyaabo ama habab daaweyneed oo kala duwan. Maadaama oo qofku qeyb ka yahay aad beey sidoo kale muhiim u tahay inaad ogooto sideey wax u dhacayaan, isku dey inaad weydiiso su'aalo badan si aad u hesho macluumaad kugu filan.

**Haddii aanad helin macluumaad ama warbixin ku saabsan dabiibka ama daaweynta, waa in aad mar walba weydiisaa shaqaalaha.**

- Waa maxay sababta la iiga qaadayo sheybaarka?
- Waa maxay sababta la iigu sameynayo baadhitaanka?
- Wax khatar ahi mak u jiraa?
- Fursado kale oo la kala dooran karaa ma jiraan?
- Goorma ayaa la i baadhi doonaa?
- Ayaan la xidhiidhayaa haddii la ila soo xidhiidhi waayo?
- Sideen baan u diyaar garoobayaa?
- Ma jiraan wax ay haboontahay in aan fiiro gaar ah u yeesho markaa ka dib?

## WIXII MACLUUMAAD EE DHEERI AH

Xuquuqda caruur iyo waalidka ee daryeelka caafimaadka. Iskaan garee koodkan wuxuu kuu sii gudbin doonaa ilaa iyo bogga intetrka ee 1177 oo ku qoran afkaaga hooyo.



Macluumaadka ku saabsan daryeelka caafimaadka ee Iswiidhen, haddii aad tahay magangelyo doon ama ama aan hasan wax sharci ah.



## MAXAA AY TAHAY IN AAN KA FIKIRAA?

Waad isku diyaarin kartaa inta aanad booqan ka hor rugta caafimaadka xaafada ama isbitaalka.

Sii qora waxa aad rabto in aad weydiiso ama aad rabto in lagaa caawiyo, in aad sii qoroto su'aalahaaga waxay kuu fududeyneysaa in aad xasuusato su'aalihii aad qabatey.

Haddii aad is weydiineyso wax ku saabsab daaweyntaada waxaa aad tusaale ahaan weydiin kartaa.

- Dabiibka ama daawynta la kala dooran karo waa kuwee?
- Waa maxay khasaaraha ama faa'iidad ku jirta?
- Maxaa dhacaya haddii aan qaadan waayo wax daawo ah?
- Ma jiraan wax dhibaatooyin ama wax khatar ah oo iiga imanaya daaweynta?
- Sideen ku ogaanayaa in daawadu sidii la rabay ay wax iigu tartaya?
- Goorma ayey bilaabanaysaa daaweyntu?
- Mudo intee dhan bey qaadanaysaa daaweyntu?
- Maxaa ila gudboon in aan ka fikiro ama aan sameeyo si natiijada daaweyntu u noqoto sida ugu wanaagsan ee suura gal ah?
- Ayaan la xidhiidhayaa haddii aan wax su'aal ah aan qabo?
- Xagee ayaan ka heli karaa macluumaad ku saabsan cudurkayga iyo daaweyntiisa?

## WAA IMIS QIIMUHU?



**Haddii ay da'adaadu ka yartahay 18 jir** uma baahnid inaad bixiso wax lacag ah marka lagu daaweynayo.

**Haddii ay da'adaadu ka weyntahay 18 jir:**

Booqashada dhakhtarka rugta daryeelka caafimaadka waa 50 karoon, haddii meel kale lagaa soo direy (remis) Booashada talo bixiyaha (kurator), kalkaalisada caacimaadka, ama kalkaalisada jimicsiga (sjuk gymnast) waa 25 karoon haddii lagu soo direy (remis).

Daryeelka isbitaalku waa bilaa lacag.

Daawada dhakhtarku riyeeto (receipt) kuugu soo qoro waa ugu badnaan 50 karoon.

Ka hortaga cudurada caruurta, daryeelka hooyada, daryeelka haweenka uurk leh iyo umilntuba waa bilaa lacag.



**Haddii ay da'adaadu ka yartahay 18 jir** uma baahnid inaad bixiso wax lacag ah marka aad u baahato dareelka xagga ilkaha.

**Haddii ay da'adaadu ka weyntahay 18 jir:** waxaad bixineysaa 50 karoon mar kasta oo aad booqato dhakhtarka ilkaha.

## XAGEE BAAN LA XIDHIIDHAYAA HADDII AAN AHAY MAGANGALYO DOON OO AAN XANUUNSADO?



Telefoon 1177

www.1177.se

Haddii ay ku xanuunaan dhuunta ama dhagaha oo ay ku qabato qandho/xumad maalmaha ugu horeeysa ama ay ku xunaan xubnaha laa-laabyada ama ku xanuunaan murquhu ama aad qabto hargab ama aad hubin waxa ku haya ama aanad ogeyn messha aad la xidhiidheysa.



Haddii aad **wacdo 1177** waxaa aad ka heleysaa talo bixin ku saabsan wixii aad sameyn lahayd ama meesha aad aadayso si aad u hesho daryeelka aad u baahantahay kalkaaliso caafimaad oo haysata leeyasan.

**1177.se** waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan cudurada, calaamadaha iyo daaweynta ama dabiibka.

## RUGTA DARYEELKA CAAFIMAADKA


Dhaawacyada iyo cudurada ama jirooyinka aaney ku jirin halis ah in loo dhinto, murgacsho iyo caalamdo aad mudo badab isku arkeysey iyo xitaa baadhitaan caafimaad oo lagu sameynayo caruurt dhawaan dhalatay iyo daaweynta cudurada ama jirooyinka iska caadiga ah, tusaale ahaan sida dhuun xanuunka iyo jirooyinka aan laga bogsan sida macaanka ama sokorowga.



Rugta daryeelka caafimaadka waxaa wax lagaga qabtaa cudurada caadiga ah iyo waliba cudurada aan laga bogsan, qaybo badan oo ka mida ciduurada caruurta iyo waayeelka, cudurada dhimirka iyo six un u isticmaalka maandooriyaasha.

## QEYBTA GARGAARKA DEGDEGGA AH


Xanuunada deg-dega ah sida tusaale ahaan xanuun kaa asiiba saableyda, neefta oo si deg-deg ah kaaga soo bixi weyda, dareenka oo kaa taga, calaamado muujinaya in dhinac ku qalaley ama hadalka oo kugu adkaada, sheey xoogan oo madaxa lagaaga dhufto, laf jab, dhaawac nabur weyn, madax xanuun si deg-deg ah kuugu soo booda marka hawl adag qabato, Haddii adigoo awalba xanuunsanaa si deg-deg ah u sii darsato. Xitaa marxaladaha khuseeya xanuunada maanka (dhimirka ama maskaxda).



Qaybta gargaarka dagdagga ahi waxay ku taaalaa dhamaan isbitaalada waaweyn oo dhan. Haddii aanad hubin meesha aad la xidhiidheysa fadalan wac **1177** si aad u hesho caawimaada saxa ah ee aad u baahnatahay.

112

Haddii ay timaado marxalad aad u deg-deg badan waa inaad wacataa ambalaas. Shaqaalaha ka shaqeeya ambalaasku waa sahqaale loo carbiyey xagga caafimaadka, waxaana muhiim ah in lagu qaado isbitaalka ugu dhaw sida ugu huban.



112 waa lambarka gargaarka degdegga ee Iswiidhen. Waxaa aad halkan ka heleysaa caawimaad ambalaasaka, booliiska iyo adeegyada gurmadda.

112 wuxuu furanyahay afar iyo labaatan saac maalin kasta. 112 waxaa aad wacaysaa oo kaliya marka ay jirto xaalad degdegga oo u baahan gar gaar degdeg ah.

## DARYEELKA ILKAHA

Ilig xanuun aad u daran, ilaga oo dabca ama liiq-liiqda ama qayb ilkaha ka mid ah kaa dhacaan, haddii ilig lagu buuxiyey oo wixii lagu buuxiyey ka soo daataan ama iliga infakshan kaa galo.



Haddii aad u baahato gar gaar degdeg ah oo ku saabsan xagga ilkaha, waxaa aad la xidhiidhi kartaa rugta daryeelka ilkaha ee dadweynaka (folktandvården) ee ku taalaa meesha ama goobta aad ku sugantahay. Rugta kuugu dhow waxaa aad ka heli kartaa **www.1177.se** ama wac **1177**.